



## **Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

### **Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad Documentiga Kulankii 33aad**

---

**Taariikh: 08/06/2014**

**Kalfadhiga 4aad**

**Kulankii 33aad**

**Saacada la furay: 1:10 pm**

**Saacada la xiray: 1:40 pm**

**Guntanka: 139 xildhibaan**

#### **Ajendaha**

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Dhaarinta xildhibaanada cusub**
- 4. ka Doodidda soo jeedin wax ka bedelka xeer-Hoosadka**

**Shir-Guddoonka:** Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha shacabka,  
mudane Mahad Cabdala Cawad

Waxaa shirka furey Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Baarlamaanka Mudane: Mahad Cabdala Cawad, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyey, Xildhibaan: Sheekh Shaacir, Guddoomiyaha ayaa xildhibanada ka codsadey in ay ansixiyaan Ajendaha weyna Ansixiyeen. Guddoomiyaha ayaa u yeerey Guddoomiyaha Xeer-Hoosadka.

**Xildhibaan C/qaadir Baq-dadi, Guddoomiyaha Xeer-Hoosadka,** wuxuu soo jeediyey, waxaa horey u Akhriyey, xildhibaan Maxamed Cumar oo ah Xoghayaha Guddiga Xeer-Hoosadka, aniga ma wada Akhrinayo in yar unban dulmar-

ayaa, talo soo jeedin guddiga uu sameeyey wax weyn oo laga badaley majiraan ,waxaa laga bixiyey Faq.4aad,howl wadeenada Golaha shacabka, xilka iyo isku dubaridka Golaha in ay noqonayaan Xildhibaano,waxaa kaloo ku jira Guddoomiyaha wuxuu kormeerayaa xoghaye-yaasha,Qodobka 11 aad,waxaa laga saaray Xeer-Hoosaadk, Qodobka 16aad,xaadirida fadhiyada Golaha, 3maalmood oo isku xigta xildhibaankii maqnaada wuxuu mutesanayaa digniin qoraal ah, haduu misna cudur daar la'aan maqnaado mudo gaareysa 7maalmood oo xiriir ah, waxaa lagu ganaaxayaa 1/5 Gunno fadhiyedkiisa.

wixii maqnaansho ah ee ka badan mudada la soo sheegey waxaa loo gudbinayaa warbixintiisa Guddoonka Golaha si loo Hordhigo Guddiga Hubinta iyo Anshax marinta.

Qodobka 68aad,Hab-raaca loo ansixiyo Miisaaniyadda sharciga dhaqaalaha

Qaranka 31Oct ayaa la soo gudbinayaa miisaaniyadda qaranka, waxaa kaloo ku qoran 30jun ka hor hala soo gudbiyo, wey iska horimanayaan, waxaan la tashi ugu tagney Guddoomiyaha maaliyadda iyo Guddiga joogtada sharcigaas si wax looga badelo, waxa loo baahan yahay Digreeto Madaxweyne Xeer-Hoosaadka waa in shuruucda dalka waafaqsanyahay baa waa jib ah,waa in la soo gudbiyaa 30jun ka hor si fasaxa Baarlamaanka loo galo.

Qodobka:26aad,Ajendaha waxaa lagu darey Fr:2aad iyo 3aad eekor ku xusan wax saameyn kuma laha mana quseyan Ajendayaasha horey loo guda galey ee dhexda marayan, waxey ku saabsan yihiin wax ka badelka Ajendayaalka cusub ee uu san Guluhu wali guda galin.

Qodobka 75aad,waa qodob ka hadlayo moshinka qaranka inta hore waa isa-ga mid, waxan ku darney in Rai'sul Wasaaraha loo gudbiyo hadii eed laga soo gudbiyo qofka waxa uu xaq uleeyahay in eedamaha ay gaaraan, Rai'sul Wasaaraha tiisa waxaa lagu xalinayaa in lagu daro saxiixayasha mooshinka,Fr.6aad ee qodobkaas waxaan ku darney markuu Guddoomiyaha uu ogaado inuu sharci yahay 5maalmood ka dib in uu Guddoomiyaha yiraahdo, waxaa naloo keeney motion,qofka soo jeedinayo waa in uu 5daqiiqo ku soo jeediyaa, qofka sekengreynayo waa in uu 5daqiiqo ku akhriyaa mooshinka.

Qodobka:77aad,su'aal wadareedyo warqadihii gadaal laga qeybinayey ayaa lagu faah-faahinayaa waxaa loo gudbinayaa guddiga Golaha ,Fr:10aad,hadii la soo jeediyo su'aal wadareed waa in la faah-faahiyaa mooshinka ay ku soo da-

ren su'aal wadareedka wuxuu hirgalayaa hal dheeri, waa in moshinkooda ay soo jeediyayaasha ay gaarsiiyaan 20% xubnaha guud ee golaha,waa in ay u codeeyaan 50+1% Rai'sul Wasaaraha iyo ku xigeenkiisa tirade guud ee Golaha sida ku cad Dastuurka.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyey,Xildhibaanada Wasiirada ah ee ka soo qeyb galey kulanka wey ku mahadsanyihiin xilka ay guteen, kuwa aan ka soo qeyb galin waa in ay gutaan waajibkooda waayo Gunno ayey ku qaataan waad mahadsantihiin.

**Shir Guddoonka, Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha shacabka mudane Mahad Cabdale Cawad,uu shir Guddoominayey kalfadhigii 4aad kulankiisa 33aad, wuxuu sheegey in uu shirka xiran yahay saacada markey aheyd 1:40 am.**